

Guudmarka Luuqadda Fudud ee Shuruucda kaalmada Dhaqaalaha

Metro waxay si bilaash ah ama qiime jaban ku siisaa adeegyada gurmada iyo daryeelka caafimaadka daruuriga ah bukaanada aan caymiska lahayn ama caymiskoodu xaddidan yahay. Marka si guud loo hadlo, bukaanada mutaystay khidmadaha qiime-dhimista leh waa in dakhliga qoyskoodu ka hooseeyo 250% Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka, halka bukaanada mutaystay daryeelka bilaashka ah ay waajib taay inay yihiin qoysaska dakhligoodu ka hooseeyo 175% Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka. Kaalmada dhaqaale sidoo kale waxa laga yaabaa in lagu heli karo duruufo kale oo xaddidan, iyadoo ku xidhan xajmiga qaamaha caafimaadka bukaanka iyo haddii bukaanku uu buuxiyey shuruudaha kale ee mutaysiga.

Bukaanaka raadinaya kaalmada dhaqaale waxa laga yaabaa inuu dalbado isagoo buuxinaya Dalabka Kaalmada Dhaqaalaha. Nuqullada Dalabka Kaalmada Dhaqaalaha, iyo sidoo kale Shuruucda Kaalmada Dhaqaalaha iyo Shuruucda Qaansheegadka iyo Dayn Ururinta Metro, waxa laga heli karaa <https://metrohealth.net/about-metro-health/billing-payment-options/financial-assistance/>. Bukaanadu sidoo kale waxa laga yaabaa inay nuqullada bilaashka ah ee Dalabka Kaalmada Dhaqaale iyo siyaasadaha la soo sheegay ay ku dalbadaan boosta, iyagoo wacaya 616-252-7110 ama 1-800-968-0051, ama waxa laga yaabaa inay nuqullo bilaash ah ay ka soo qaataan La-taliyaha Dhaqaalaha ee Metro ama Qasnajiga jooga soodhawaynta Metro Health Hospital (ku xiga Miiska Diiwaangalinta Bukaanka) ama Miiska Diiwaangalinta Bukaanka ee goob kasta oo ay Metroku taal. Dalabka Kaalmada Dhaqaale iyo siyaasadaha hore loo sheegay (iyo sidoo kale guudmarkan luuqadda fudud ku qoran) waxa lagu heli karaa Ingiriisi, Isbaanish, Carabi, Boosniyaan, Barmiis, Shiineeska-Mandariinka, Nibaali, Noorwayjiyaan, Kinyarawanda, Kuriyaanka, Soomaali, Sawaaxili iyo Fiitnaamiis.

Dalabyada Kaalmada Dhaqaale ee dhammaystiran waa in loo gudbiyaa Metro Health Hospital, Laga helo: Customer Service Office, PO Box 913 Wyoming, MI 49509-0913. Dalabyada waxa laga yaabaa in qofku geeyo La-taliyaha Dhaqaalaha Metro ama Qasnajiga jooga soodhawaynta Metro Health Hospital (ku xiga Miiska Diiwaangalinta Bukaanka) ama Miiska Diiwaangalinta Bukaanka ee goob kasta oo ay Metroku taal. Dalabyada sidoo kale waxa lagu diri karaa boosta U.S. iyadoo lagu hagaajinayo cinwaanka sare ku qoran, ama iimeyl loogu diri karaa CustomerService@metrogr.org.

Dadka raadinaya macluumaad dheeraad ah ama u baahan in laga caawiyo dhammaystirka Dalabka Kaalmada Dhaqaalaha waxay kala xidhiidhi karaa mid kamid ah Wakiilada Metro oo tabobaran Xafiiska Adeegga Macmiilka (616) 252-7110 ama 1-800-968-0051, Isniinta – Jimcaha 7:30 g.h. – 4:45 g.d.

Bukaanaka u-qalma kaalmada dhaqaalaha sida ay dhigayso Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale marka la eego daryeelka xaaladda gurmada ama caafimaad ahaan daruuriga ah laga qaadi maayo in ka badan lacagta sida qaalibka ah ay ku soo dallacdo Metro adeegyada la midka ah ee la siiyey shakhsiyaadka leh caymis daboolaya daryeelkan.